## QALNIIN LAGU SAMEEYO DALKA DIBADIISA

Sharciga wuxuu khuseeyaa Norwey iyo dibadaba. Tani waxay ka hortageysaa in ilmaha la geeyo dal gudniinku uu caadi ka yahay, si loogu soo gudo halkaas. Mammnuucidda naafeyn xubin taran waxay sidaas darteed khuseysaa qof norweeji ah ama deggen Norwey, haddii uu sameeyo ama ka qeybqaato in gudniin lagu sameeyo dalka dibadiisa

## WARBIXIN KALE

> Waddo-tusaha shaqaalaha caafimaadka Norwey ee ku saabsan gudniinka dumarka (Waxaa soo saaray Kormeerka caafimaadka dowladda, lambarka lagu dalban karo IK-2723)

> Qorshe-wax-qabad ee ka hortaga naafeyn xubin taran. (Ay soo bandhigtay dowladda 20. Disembar 2000, waxaa laga dalban karaa Wasaaradda carruurta iyo qoyska, tlf. 22 24 24 07. Buug warbixineedkani wuxuu ku daabacan yahay afafka norwiijiga, ingriiska iyo fransiiska.)


Waxaa soo saaray
Wasaaradda bulshada iyo caafimaadka

Hay'adda dowladda waxay dhowr nuqul ka dalban karaan
Statens forvaltningstjeneste
Informasjonsforvaltning
Postboks 8169 Dep, 0034 Oslo
Telefakis: 22 24 27 86
E-mail: publikasjonsbestilling@ft.dep.no

Lambarka dalabka I-1053 SO


# Buug warbixn oo ku saabsan sharciga naafeynta xubinta taranka

SOSIAL- OG HELSEDEPARTEMENTET

## SHARCIGII SOO BAXAY 15 DISEMBAR 1995 EE LAMBARKIISUNA YAHAY 74 EE KU SAABSAN MAMNUUCIDDA NAAFEYNTA XUBINTA TARANKA

**§ 1.**

Qofka si ulakac ah u qala xubinta taranka dumarka oo u geysta dhaawac ama isbeddel joogto ah, waxaa lagu ciqaabayaa naafeyn xubin taran. Ciqaabta waa xabbis ilaa 3 sanno ah, laakiin waxay noqon kartaa ilaa 6 sanno haddii qalniinka uu keeno jirro ama shaqo-gab waarta in ka badan 2 wiig, ama cillad aan la daweyn karin, ama waxay noqon kartaa ilaa 8 sanno haddii qalniinka uu keeno dhimasho ama dhaawac weyn oo jireed ama caafimaadeed. Ka qeybqaadashada qalniinka xataa waxaa loo ciqaabayaa sidaas oo kale.

Dib-u-naafeynta xubinta taranka waxaa loo ciqaabayaa sida ku qoran qeybta kowaad.

Ka raali noqoshadu ma masaabaxayso ciqaab.

**§ 2.**

Sharcigu wuxuu hirgelayaa wakhtiga uu Boqorku go'aamiyo.

Hirgalay 1 Janaayo 1996.

## DANTA LAGA LEEYAHAY SHARCIGA

Danta laga leeyahay sharciga waxay tahay in la caddeeyo in naafeynta xubinta taranka dumarka ay mamnuuc ka tahay Norwey. Sharcigu wuxuu horistaagayaa in gabdhaha la gudo. Qalniin noocaas ah ee lagu sameeyo xubin taran waa wax dhaawaca caafimaadka oo aan la oggolaan karin, sida uu qabo sharciga norweejiga.

Gudniinka wuxuu Norwey waligiis ka ahaa wax mamnuuc ah, laakiin u sameynta sharci u gooni ah oo mamnuuca naafeynta xubinta taranka waxay si cad u qeexeysaa arrintan. Sharcigu wuxuu si cad u muujinayaa mowqifka masuuliyiinta norweejiga ay ka taagan yihiin gudniinka dumarka

## ERAYGA NAAFEYN XUBIN TARAN

Sharciga wuxuu isticmaalaa magaca ah "naafeyn xubin taran", waana magaca Caadiga ah ee ururka caafimaadka aduunka iyo ururro kale oo caalami ah ba, oo ka shaqeeya ka ortaga caadadan. (Af ingiriiska waxaa lagu yiraahdaa "genital mutilation"). Magacan wuxuu hoosta ka xariiqayaa waxa dhabahaantii qaliinkan u xanbaarsan yahay. Erayga wuxuu mujinayaa in gudniinka dumarku uu yahay qalniin wax baabbi'ya. Sidaas darteed ayay naafeynta xubinta taranka dumarka ay si cad uga duwan tahay gudniinka ragga, oo ah fal diineed iyo dhaqameed oo aan lahayn caaqibo caafimaadeed oo khatar ah oo la garanayo.

## QALNIINKEE BUU KU SAABSAN YAHAY SHARCIGA?

Mamnuucida sharciga waxay khuseeysaa nooc walba oo gudniin dumar ah halkaas oo xubinta taranka lagu dhaawaco ama loo geysto isbeddel joogto ah. Waxaa halkan loo jeedaa dhammaan noocyada laga billaabo nooca ugu weyn ee qeyb weyn oo kamid ah xubinta taranka la gooyo oo duleelka siilkana laysku tolo "fircooni", ilaa qalniinka lagu jarayo qeyb ama dhammaan kintirka. Waxaa xataa mamnuuc ah in mar labaad laysku tolo fircooniga, tusaale ahaan foosha keddib. Waxaa islamarkaasi si buuxda loo oggol yahay in la sameeyo qalniin dib loogu celinayo xubinta sidii hore ee caadiga ahayd inta suurogal ah. Mamnuucidda ma khuseyso qalniinka xag caafimaadeed sabab leh, tusaale ahaan qalniinka lagama maarmaanka ah ee foosha la xiriira, go'ynta xubinta taranka cudurrka kansar dartii ama wixii la mid ah. Saxidda cillad lagu dhashay qalniin jinsi-beddel sharciyeeysan xataa ma khuseyso mamnuucidda.

## YEY KHUSEYSAA MAMNUUCIDDA?

Ciqaabtu waxay ku socotaa qof walba oo gudniin ku sameeya dumar. Waxaa xataa mamnuuc ah in laga qeybqaato naafeynta xubin taran, inkastoo uusan qofka naftiisa sameyn qalniinka. Sidaas darteed waalidka iyo dadka kaleba waa la ciqaabi karaa haddii ay ka qeybqaataan in gabar la gudo. Mamnuucidu way khuseysaa mar walba xataa haddii qofka dumarka ah ay oggolaatay gudniinka. Qofka dumarka ah naftiisa lama ciqaabi karo.